

Aqoonsiga, Meelaynta iyo Ilaha loogu tala galay Guddiga Dib u eegista *Khayraadka Waalidiinta/Mas'uulka*

Waa maxay IPRC?

- Guddiga Aqoonsiga, iyo Dib u eegista (Identification, Placement and Review Committee) (IPRC) waa guddi maamulka dugsiga ah kaasoo go'aan ka gaara in xaalada canuggaagu ay tahay gaar iyo nooca meelaynta sare u qaadaysa awoodda canuggaaga. Sharciga Wasaaradda Waxbarashada 181/98 ayaa hagaya hanaanka IPRC.

Ma ogtahay?

In IPRC ay tahay ereyo la soo gaabiyay. Xaraf kasta waxaa loo qeexaa didan:

- **I = Aqoonsiga:** Dukumiintiyada caafimaad ama daawo oo gaar ah ayaa loo isticmaalayaa go'aaminta in canugga loo aqoonsado in uu kujiro xaalad gaar ah iyo in kale, ayada oo la tixraacayo noocyada iyo qeexitaanada ay bixiso Wasaaradda Waxbarashadu.
- **P = Placement (Meelayn):** Goobta canuggaagu dugsiga ka xaadirayo. Xulashooyinka waxaa kujira fasal iska caadi ah iyo mid wax kasta gudaha ku leh. Guddigu waxay sidoo kale ku talin karaan codsi loo diro Dugsiga Heer gobol (hadday khusayso).
- **R = Review (Dib u eegis):** Waa kulan la qabto sanadkii hal mar si dib loogu eego hormarka ardayga loona go'aamiyo in xaaladda gaarka ah wali loo baahan yahay iyo in kale.
- **C = Committee (Guddiga):** Ayada oo ay la socoto saamaynta waalidka guddigu waxay gaaraan go'aanka ku saabsan in canuggu kujiro xaalad gaar ah iyo in kale iyo barnaamijkooda meelaynta.

Waa maxay kaalintaadu?

- In aad la wadaagto awoodaha, baahiyaha, rabitaanada canuggaaga, iyo sidaa si lamid ah dukumiintiyada caafimaadka iyo daaweynta.
- Kala hadal shaqaalaha dugsiga in IPRC loo baahan yahay iyo in kale.
- Xaadir, ka qaybqaado fahamna hanaanka IPRC iyo go'aanada laga qaato canuggaaga.
- Faham in aad codsan karto meelaynta fasalka caadiga ah iyo dugsiga xaafadda canuggaaga.
- Weydii Maamulaha canuggaaga su'aal walba oo aad ka qabto IPRCs.

Fadlan ka tixraac Taxaneyaasha Muuqaalada Macluumaadka Adeegga Khaaska ah ee HWDSB si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan mowduucyada la xiriira waxbarashadagaarka ah, oo kamid tahay IPRC.

Wax badan ka ogow halkaan www.hwdsb.on.ca/about/special-education